


Taariikhda Gobolka Daadmadheedh iyo Degmadda Oodweyne.

HOR- DHAC :

Wixii aan la qorin ee aan qalinka lagu duugini wax qiimo ah ma leh, Somalidu Waxa ay Wax Isku Soo gaadhsiiyaan, Wax loo yaqaan Oral traditional, Taas oo ah Sheeko dhaqameed Fac ka Fac Afka un laysugu sheego, iyada oo aan qoraal laga samayn laguna suuraynin, muddo ka dibna sidaa ku luma kuna baaba'a.
Sidaa daradeed waxa aan go'aan saday in aan Soo ururiyo taariikhda dahabiga ah ee faca iyo faraha wayn ee ku duugan Gobolka Daadmadheedh., Aniga oo samaynaya Xog raadin rasmi ah , Una kuur galaya oo kaashanaya lana kulmaya, Dadka aqoonta buuxda u leh taariikhda gobolka Daadmadheedh, ee ku noolaa muddo dheer ama mid dhawba tay doonto ha ahaatee, Si aan u helo Xog iyo Xigasho Xaqiiq ah oo aan ku xariiqo kuna xardho bayd ka mid ka mid ah baydadka taariikhiga ah ee Buugtu ay leedahay.

Hadaba waxaa aan muqaalo aan ka diyaarinayaa kuna waraysanayaa, Waa hadii alle yidhaaye, qaar ka mid ah Odayadda, wax garadka, Aqoonyahanada, Indheer-garadka, taariikhyahada, Abwaanadda,Siyaasiyiinta, Cuqaasha, Ganacsatada iyo Cid walba oo haysa ama aqoonta buuxdana u leh taariikhda guunka ee Gobolka Dadmadheedh iyo waliba mahadooyinka ku dayran kuna duugan Magaaladda gaadiiday ee Oodweyne.

Inta aanan Muqaal ahaan idiinku soo gudbin Taariikhda Deegaanka Oodweyne, Waxaan jeclahay in aan soo bandhigo, Taariikhda Gobolka oo kooban, anigoo waliba jecel in aan u soo bandhigo Sida ugu macquulsan uguna macruufsan.

TAARIIKHDA GOBOLKA OO KOOBAN.:

Gobolka daadmadheedh Waxa uu ku yaalaa Badhtama dhexe ee Jamhuuriyadda Somaliland ,Xaruntiisu Waa Degmadda Oodweyne, Oo degma-nimada la Siiyay horaantii Sanadkii 1962-kii.
Gobolku Waxa uu xuduud kala leeyahay afarta jiho, Bariga Gobolka Togdheer, Galbeedka Gobolka Maroodi jeex, Waqooyi Gobolka Saaxil, Xagga Koonfurna uu kala leeyahay Xuduuda u balaadhan Dawladda Is maamulka Somalida ee Itoobiya.
Gobolka Daadmadheedh waxa Uu Xukumaa 56 magaalo ama tuulo, Iyo afar Degmo Oo kala ah Degmadda Oodweyne, Xaaji Saalax, Haro Shiikh iyo Degmadda Khaatumo . ( Waa marka aan lagu darin laba magaalo ee Dheeli-wayn iyo magaalo Cad oo aan wali la sharciyeyn).

Gobolka Daadmadheedh waxa uu ka mid yahay, Lixdii Gobol ee cusbaa ee uu Madaxweynihii hore Jamhuuriyadda Somaliland Mudane Daahir Rayaale Uu magacaabay Sanadkii 2008.
Deegaan Ahaan Gobolkani waa Gobolka ugu baaxadda wayn ama ugu balaadhan deegaanada Goboladda Somaliland, Marka laga Reebo Gobolka Sanaag oo isagu ku jira Kaalinta Kobaad.
Gobolka Daadmadheedh Waa dhul aan ahay Buuralay, Waase dhul Daaqsimeed ku Wacan wax Beerashadda, lehna dooxooyin aad ugu bisil Wax beerista, Cimiladiisu waa dhex dhexaad ,waxaanu leeyahay Carro san oo ku fiican Dalag beerashadda, Tusaale ahaan Haayadda ka shaqaysa mashaariicda Horumarinta Wax soosaarka ee layidhaahdo Food and AgriCulture Organization ( Fao) Daraasad ay ka Samaysay Gudaha Goboladda Dalka Somaliya iyo Somaliland, Waxa ay Warbixin ku sheegtay Inuu Gobolka daadmadheedh kaga jiro kaalinta Kobaad, Xagga dhul beerashadda Ciddiisa oo Dihin Awgeed.

Gobolka Daadmadheedh Waxa uu leeyahay Todoba tog oo aad u waayay oo ku baaha dhamaan Deegamadda Gobolku leeyahay, Sidoo kale Waxa uu leeyahay Harooyin Waaweyn Oo Xareedda iyo nimcaddu ay Ceegaagto, Sida Haradda Ceeg oo ah Bad ilaahay Ka dilaaciyay deegaanka, haradaas oo aan Gu' iyo jilaaltoona aan Gudhin.
Gobolkani Waxaa uu Caan ku yahay Geedaha iyo Dhirta Cagaarka ah, Waxaanu sidoo kale leeyahay Dhul Cawseed cokan iyo Ban daqsimeedyo balaadhan Oo baaxad leh, Sida Baanka Aroori & Baanka Tuunyo, Sidoo kale laf dhabarta dhaqaalihiisu Waxa weeye Xoolaha Nool,

Waxaana lagu tilmaamaa inuu yahay Gobolka ugu Xoolo dhaqata badan Goboladda Somaliland.

Hadii aynu eegno Xagga, taariikhda Ganacsiga Deegaamadda, Gobolka Xaruntiisa Oodweyne Waxay ahayd magaalooyinka ugu Da'da iyo faca Wayn Somaliland, Waxaana ka horeeyay oo qudha Magaalooyinka ku yaala Xeebaha Sida Berbera, Bula-Xaar iyo Saylac.
Odweyne waxa ay ahayd Magaalo ganacsi, Waxayna isku Xidhi jirtay Deegaamadda Hawd fog iyo Magaaladda Berbera oo ahayd Dekadda ay wax uga soo degaan Bulshadda, Oodweyne Waxa wakhtigaa deganaa Ganacsato Ama tujaar ah Carab iyo Hindi kuna lahaa Goobo ganacsi oo Ilaa hadda ay muuqato Aasaartoodii qadiimiga ahayd.

Gobolka Ood wayne waxaa Uu lahaa Oo alle ugu deeqay mawhibo Sharafeed ah Bulsho Saaxiibul Caqli ah oo ka dhex tilmaaman Umadda Somaliyeed, waxaana ku dhashay kuna Barbaaray, Qaar ka mid ah Hogaamiyeyaashii Soo maray ama u talin jiray Ummadda Somaliland ama Somaliyeed, Ha ahaato Aqoonyahan Umadda Wax baray, Ha ahaato Hogaamiye Umadda hagay Oo hanuuniyay, Ha ahaato Mujaahid Cadawga La dagaalay Oo umadda Caawiyay, Ama Siyaasi Wax soo kardhiyayba ha ahaate, Oodweyne Waa Gobolkii Guusha iyo Geesiyadda. Tusaale ahaan hadii aynu tilmaamno qaar ka mid Dadka ugu magaca wayn Xagga Bulshadda Somalida ah ee Ka soo jeeday Gobolka daadmadheedh Waxaa ka mid Ahaa:
1. Suldaan Diiriye oo ahaa Suldaadii Ugu magaca iyo Miisaanka waynaa Somalidda kuna Caan baxay Maamul iyo Xeer Yaqaanimoo. Waxaanu ahaa Ninkii Sameeyay Xeerar lagu dhaqmo laguna badbaado, Waxaanana Xeerarkiisii ugu danbeeyay Xeerkii ahaa " Raqba waa ku rageed"
2. Maxamed X. Ibraahim Cigaal Oo ahaa Siyaasiyiinta Ugu faca waynaa Somaliya Lagana yaqaano gudo iyo debedba ayaa waxa uu isna ku dhashay kuna soo barbaaray, Magaaladda Oodweyne ee Xarunta Gobolka daadmadheedh.
3. Abwaan Cali Sugule Dun Carbeed Oo ahaa Aabaha afka Murtida Somalida ayaa Isna ka mid ah Abwaanadii ku dhashay.
4. Abwaan Ismaaciil Cagaf Ayaa isna ka mid ah Abwaanadda ku dhashay.
5. Abwaan Axmed Saleebaan Bidde oo ahaa Hal abuuradda ugu caansan Gayiga Somalidda ayaa ka mid ah.
6. Cabdiraxmaan Axmed Cali ( Cabdiraxmaan Tuur) AHN Oo ahaa Siyaasi aan marnaba la ilaawi doonin.
7. Aqoonyahan Maxamuud Axmed Cali AHN Aabihii Aqoonta, Waana ninkii Hindisay Qorista Afka Somaliga, Maantana Cid walba oo wax qorta waxna akhridaa Ay abaal wayn u hayaan.
8. Maxamed Axmed Kuluc Faanan laga yaqaano Gayiga somaligada Oo dhan.
9. Cabdiraxaan Cirro oo ah Siyaasi Caan ah oo qunyar Socod ah ayaa isna ku dhashay kuna soo barbaaray.
10.Ina iigare Oo ahaa raggii ingiriisku ka wareeray ee Magtii giib U siiyay 33 iyo hal daloolkeed.
Intaas ayaa tusaale inoogu filan Waayo Lama soo koobo karo inta haldoor u dhalatay, ama ku dhashay Gobolkan.

Xagga waxbarashadda Hadii aynu eegno Ardayga wax ku bartaa Oodweyne waa uu ka tilmaamnaa Ardayda kale, Waayo waxa ay ahayd Hoyga waxbarashadda Somaliland iyo Somaliyaba , Marka laga reebo Degmadda Sheekh Ee Gobolka Saaxil, sababta Oo ah Waxay Caan ku ahayd magaalada Oodweyne, Bulsho U bisil una baahan Waxbarashadda, Bulshadaas oo Fahanmaysay awgeed, Haykalka,Habka iyo Hanaanka geedi socod ee loo maro Waxbarashadda Nooc walba oo ay tahay.
Waxaana ka jiray Magaaladda nidaam iyo kala danbayn ku dhisan Qawaaniin iyo sharco lagu horumarinayo tarbiyadda Ardayda iyo kaalintooda waxbarasho, Taasina waa ta ay ku kasbatay in magaaladu noqoto Mid ku suntan Goobaha ugu wacan gayiga Xagga tayada waxbarashadda.



Hadii aad tagta Magaalooyinka Muqdisho, Boorame iyo Meelaha kale ee ay somalidu ay degtaba , Dhammi Masuuliyiinta Xukunkooda haysa ama hayn jirtayba waxay Ahaayeen kuwo wax kusoo bartay ama ku soo barbaaray Magaaladda Oodweyne Waana Hibo iyo Haybad uu alle siisay in ay magaaladani ay noqoto hoyga Hormoodka iyo Haldoorka Umadda Somaliyeed.

Sidoo kale Gobolka Daadmadheedh Waxaa Uu leeyahay Goobo ku wacan dalxiiska Oo indhaha iyo aragtidaba U wacan, Waxaana Aad ka garan kartaa Gobolkani waa ka qudha ee ay maraan 7 tog oo taariikhiyi, Kuwaas oo ah sida wabiyadda Cartama ee Cuudka iyo Ciiduba ay ka Cabto, Togagaas oo kala: -

1.Togga Seeto dheere oo mara magaaladda Ceel bigcile.
2. Togga Cobol-dheere oo Mara magaalada Ceel Same kuna faafa Dooxadda Gubato.
3. Togga Shinbiralay oo mara Xudunta Oodweyne toggaas oo ah labada laagood ee Agarantin & Dheen oo isku soo darsama .
4. Togga Cadeeyo Oo isna mara Deegaanka Qansaxa Iyo Caasho-Caddo.
5. Togga Dal-dawan oo ah Togga Soo mara Magaaladda Aw-barkhadle kana soo gudba tuulada Gawaamo ugu danbayna ku Biyo shubta Dariiqadda Magaalada Dahabiga ah ee Xaaxi.
6. Togga Carro-Wayne Oo isna mara magaalooyinka Galoolay iyo Qaloocato.
7. Togga 7aad oo la yidhaahdo Masango Isna mara magaaladda Dooxada Qurxoon Ee Gatiitalay.

Gobolka Daadmadheedh Waa dhul Leh Taariikho ma guraan ah Iyo Goobo lama huraan ah, Tusaale ahaan Buurta Qar-bigil Waa buur ay ku yaalaan Raadad badan iyo Aasaar qadiimiyi Sida Waxyaabihii iyo Wacdarihii Faraaciyiintu ka tagtay, Waxaana ku xardhan qaybo ka mid ah Hindiskoodii .

Xagga dhaqashadda Xoolaha Gobolkani Waxa uu kaalinta kobaad kaga jiraa Dhaqashadda Xoolaha Siiba Geela, Waana meelaha ilaa hadda dhaqan ahaan Geella loo bixiyo Gabaati iyo yarad.
Geela ka sokow Bulshadda Deegaanka Waxay dhaqan u leeyihiin Soo dhawaynta Iyo Sooryaynta Martida Waana Gacal sooreyaal Ku wacan Marti galinta iyagoo U gogla oo ku soora awr gool ah, Taasina waa mid ay Gaar ahaan iyo Gobol ahaanba ay Dhaqan u leeyihiin.

Xagga Gobonimo doonka marka la eego, Bulshadda ku nool Deegaanka iyo Degmadda Oodweyne Waa Dad jecel Nabadda iyo Xasoolinadda, Balse Sidoo kale waa Geesiyaal aan Ka gaban Cadowgooda, Waana Gadh-wadeeno U guntada una Gurmadda Gobonimadda iyo La gorgoortan Gumaysiga iyo la Dagaalankiisa.
Oodweyne Waa Goobihii ugu horeeyay Ee laga Sameeyo ama lagaga dhawaaqo Urur Ah Gobonimo doon iyo gumaysi Diid sanadkii 1954, Ururkaas Oo Magaciisu ahaa Xisbu-laah oo lagu sameeyay Magaaladda Taariikhiga ah ee Laan-Mulaaxo.

Sidoo kale Gobolka Daadmadheedh Waa Goobihii ugu horeeyay ee lagaga Kaco Gumaysigii ingiriiska waana Isla Goobihii Lagu Gadiyay ama Gumaaday Maamulkii Dawladda Siyaar Barre.
Oodweyne Waxaa uu ahaa gayigii u badnaa Ee ka qayb qaata La dagaalankii iyo la dirirkii Maamul Xumadii Siyaad Barre, dhanka kale hadii aad eegto Geesiyadii SNM ee Gayiga Xoreeyay, kuwooda ugu Cadcadi waxay ahaayeen Reer Oodweyne Waxaana tusaale inoogu filan, Mujaahid, Lixle, Maxamed Cali, Haragwaafi, Axmed Mire, Cabdiqaadir Koosaar Iyo Madaxdiin Alle ha u Naxariisto dhamaantoode, Xagga Gumaystihii Ingiriiska Ninkii ugu horeeyay ee ka dhiidhiya Kana dhawaaqaa dhibaatada gumaystaha, Waxa uu ahaa Boqorkii Suugaanta Somalida Abwaan Cali Sugule Dun-Carbeed Alle ha u naxariiste, Isna Inbadan ayuu Gabay iyo Geeraarba ku Guubaabiyay Umadda reer Somaliland Sanadkii 1954-kii Waa kii lahaa:-

Garaad inama dheera gaaladu
Gugeenuna waa gudboon yahay
Ayaa guulaheen gargaaraa,

Ayaa garanaaya gobanimadoo,
Ayey la genbiya gumeystaha !!

Xagga Jiritaan Gobolkani Waxaa uu ahaa Goobaha ugu Caan san gayiga Somalidu Degto waxaana uu ahaa Goob Lagu halqabsado oo La Cuskadda Si aan loo Ciirin waayo Meel waliba Waxa ay leedahay Hir iyo Hanaan gaar u ah, oo lagu xuso dhacdadeeda.

Tusaale ahaan Xagga Gaarimadda Dumarka Marka la tilmaamayo Oodweyne Waxaa uu ahaa Goobaha lasoo gawaan raaco laguna yaqaanay Garasho iyo Gobonimo Gabdheedh, Waxaana iyana Tusaale iyo tixraacid inoogu filan, Qarni horteed markii Abwaan Saahid Qamaan uu xaaskiisa ku guubaabinayay Gaarinimadda ee uu lahaa:-
*Oodweyne reeraha ku jira, nimanka Iidoor ah
*Afarta beynu jaho uumiyaha yaal, odayga Daarood ah
* Intaasaan ilaalo u dhexmaray, dumarna eegaayey
* Asli midabkii leeyeey haddaan, adiga kaa doortay
* Oon wada anfiyey naago kale, odayna kuu raacay. *Arday iyo siddii macallin baan, kuu af-barayaaye
* Naahooy aan eray kuu dhigee, qaado odhaahdayda

Cilmi Boodhari Isna Alle Haw naxariistee Waa kii Ku Calaacalay Markii uu inantii uu jeclaa Waayay, isagoo leh Oodweyne iyo Abtiyadayba Waan ka heli lahaa hablo Qurux iyo qiimoba leh'-

* Abtiyaaladay baa ii ekaa inaan adeecaaye
* Ammaantii ugaadh Cumar lahaa Ereg maxaa geeyey
* Qaar hooyaday u Edo tahoo aadabaa jira'e
* Ama dara iyo Oodweyne way omos badnaayeene
* aagamo haddii loogu shubo ma engegnaateene
* Abaaraa ku doogoobi laa erayadaydiiye.

Dhanka kale Xagga Taariikhda Marka ay tahay Oodweyne Waxa lagu Xusaa laguna Xasuustaa

La Soco Qormooyinka kale

Alla mahad leh….

Qalinkii Sayid Maxamed Cumar (Darwiishka)
Tell: 252-63-4381712